


# MEELO QUR-QURXOON EE VATTENRIKET



● Xarunta booqashada naturum ee Vattenriket

## 1. NORRA LINGENÄSET

Norra Lingenäset waa kayn caleemood qurux badan oo ku dhaw Kristianstad. Xilliga guga waxaa dhulka daboola ubax, shimbiruhuna geedaha ayay ka dul heesaan. Dhabbagu waxaa uu ku geynaya minaarad-shimbireed iyo muuqaalka badyareyda Araslöv. Haddii aad rabtid in aad gashid wareeg dheer, waxaa jira dhul daaqsin ah iyo kayn dhiiqo badan oo la baari kartid. Meesha baabuurta la dhigto waxaa ku yaalla musqulo iyo miis weyn oo kuraas leh. Meesha baabuurta la dhigto agteeda waxaa ku yaalla meel waxa lagu dubto oo muuqaal fiican leh. *Soo hel halkan:* Norra Lingenäset waxaa ay in yar waqooyiga ka xigtaa Kristianstad. Baaskiil, baabuur ama baska 1 u soo qaado Albogatan, qeypta dambana soo lugey 2 kiiloomitir.

## 2. EKENABBEN

Ekenabben waxaa ay ku dhawdahaya Hammarsjön oo koonfur bari ka xigta Kristianstad. Waa meel fiican, halkaas oo lagu qaxweyn karo, wax lagu duban karo, mallaay laga dabani karo, shimbiro laga fiirsan karo, laguna lugayn karo juqda qoraxda badan. Lugaynta kaynta waa ku dhawaad 800 oo mitir, waxaana la dul marayaa buundo-qoryeed yar. Ekenabben waxaa ku dherirsan geedaha alwaaxda laga sameeyo oo waaweyn oona qurux badan Halkaasna waxaa ka baxa dhabbay taga minaarad-shimbireedka, halkaas oo uu qofku ka arki karyo badda yar ee Hammar. Ekenabben agteeda waxaa ku taalla musqul Ka iibso naturumka kaar mallaay dabasho haddii aad dooneysid in aad mallaay dabatid. *Soo hel halkan:* Meesha la booqdo ee Ekenabben waxaa ay ku taalla Hammarslund akteeda. Lug, baaskiil ama buska khadka 1 uga imaw magaalada halkan. Baabuurta waxaa loo helayaa meel la dhigto.

## 3. VRAMSÅN

Vramsån waa mid ka mid ah biyo mareennada yar-yar ee ugu fiican Caalamka biyahay. Biyo nadiif ah ayaa kasoo shubmaya Linderödsåsen oo ku shubmaya biyo mareenka yar. Biya mareenka yari waxaa uu gani ku yahay alaalaxaay, cayayaan iyo mallaay. Meeshii hore ee dabaasha ee tuulada Gärds Köpinge agteeda waxaa looga soo dhawaanayaa biyaha. Halkan biya mareenku tartiib ayuu horay ugu socdaa iyada oo ay dhinacyada uga hareereysanyihin iyo geedaha dhala miraha kastaanyaha oo adag. Meesha dabaasha agteeda waxaa ku yaalla meel baabuurta la dhigto, meel caws leh iyo meel wax lagu dubto. Kristianstad Tourist Center ka iibso kaarka mallaay dabashada.

*Soo hel halkan:* Meesha la booqdo ee "Vramsån" waxaa ay ku taalla Gärds gudeheeda. Köpinge. Baaskiil, baabuur ama baska gobalka ee 553 qaado. Tabbeelle ayaa ku tusaya waddada la maro ee ku dherirsan waddada baaskiilkilaa ilaa iyo Vramsån.

## 4. ÄSPET

Badda Åhus agteeda waxaa ku yaalla Äspet. Marka laga reebo xeeb cajiib ah waxaa jira halkan meel yar oo badda ka go'an oo soo jiidata shimbiro badan. Meesha yar ee badda ka go'an waxaa ku yaalla labo minaarad-shimbireed. Kanya qurxoon ee xaggaas iyo dhulka gudhiisa waxaa jira meelo lagu lugeeyo oo badan. Xeebta agteeda waxaa ku yaalla meel baabuurta la dhigto oo musqul leh. Halkanna waa laga gaaraa minaarad-shimbireedka. 150 mitir koonfurta meesha baabuurta la dhigto waxaa ku yaalla meel waxa lagu dubto oo bacaadka ku dhiggan.

*Soo hel halkan:* Äspet waxaa ay ku taalla koonfurta dekadda Åhus. Raac waddada Ävägen, kaddibne Snickarehaksvägen ila laga gaaro xeebta. Baska 551 waxaa uu aadaa xarunta Åhus.